

Raage Ugaas

Alleyl Dumay

Alleyl dumay albaabbadoo xiran, uunku wada seexday
Onkod yeedhay uugaamo roob, alif banaadiiq ah
Iihdayda bixi baa libaax, iman la moodaaye
Raggase adhaxdiyo ooftu waa, udub dhexaadkiiye
Labadii wax laga eegi jirey, waan ka awdnahaye
Halkaan aa ka leeyahay Ilaah, keliya uun baa og
Aboodigu ma lalo garab hadduu, iin ku leeyahaye
Orod uma hollado oglihii, adhaxda beelaaye
Ma aarsado il iyo oof ninkii, iimi kaga taale
Aroos uma galbado nimuu, wadnaha arami jiifaaye
Geeluba kolkuu oomo waa, olol badnaadaaye
Sidii inan yar oo hooyadeed, aakhiro u hoyatay
Oo aabbeheed aqal mid kale, meel illin ah seexshey
Hadba waxaan la urugoonayaa, uur-ku-taallada e
Ninkii oordiisii rag kale, loo igdhaan ahaye
Ninka ilo biyo leh soo arkoo, oomman baan ahaye
Nin ugaas walaalkiis yahoo, eeday baan ahaye
Af-dhabaandhow aayar ninkaa, aammusaan ahaye

Raage Ugaas

Night Has Fallen

*Night had fallen and behind closed doors everyone was sleeping
Thunder called out with a clamour of rain like shots from a thousand rifles
So was my wailing heard that they thought it a lion approaching
For men the spine and ribsides are the body's central support
I am shut away now from the eyes through which I used to see
Only God knows the source of my lamentations
The vulture with an injury to his shoulder cannot fly
The horse who has lost his spine cannot gallop
The man injured in eye and ribs cannot seek revenge
A man whose heart aches cannot take a bride home
When the camels are thirsty their outcries increase
Like a small girl whose mother now lives in the hereafter
Whose father has brought another woman to sleep in the aqal*
I grieve constantly from the sorrow deep in my belly
I'm the man whose fiancée has been given to another
I'm the man who sees springs but whose thirst remains unquenched
I'm the man whose brother is clan leader and yet is accused
I am that silent man who sits, slowly patting his mouth again and again*

* An *aqal* is a nomadic hut used by the Somalis.